

MAAMUL-DAADAJINTA WAXBRA- SHADA ASAASIGA AH EE DEG- MOOYINKA DALKA

Maamul-daadajinta waxbarashada asaasiga ah ee degmooyinka dalka oo laga bilaabay sadexda degmo ee kala ah, hargeysa, berbera iyo gabiley, Heshiiska dhamaystirka mashruuca maamul daadajinta waxbarashada asaasiga ah ee degmooyinka hargeysa, berbera iyo gabiley oo qabsomay. Heshiiskani wuxu awood buuxda siinaya dawladaha hoose inay maamulaan waxbarashada asaasiga ee degmada.



GABILAY

MAALGALINTA DANYARTA IYO DIB U XOOLAYNTA EE DAWLADDA HOOSE GABILEY

Waa mushruuc loogu talo galey in loogu abuurto ilo dakhli qoysaska danyarta ah. Mashruucani waxa uu bilaabmay 250 qoys oo ku dhaqan Degmada Gabiley.

Mashruucani waxa uu xooga saarayaa kor u qaadida ganacsatada yar-yar. Wajjigaliso koobaad sanadkii 2020ka, waxan ka faa'iidaystay 100 qoys oo danyar ah, halka wajjigaliso labaad u ahaa sanadkan 2021ka waxaana mashruucan ka faa, lidaystay 150 qoys oo kale, guud ahaan tirade qoysasku waa 250 qoys.

Waxa la iclaamiyaa 4 cisho ka hor si qofkii ka faa'idaysanyaa is kaga soo diwaan galyo isaga oo tagaya Xafiiska ku yaal xaafada uu daganyahay una soo buuxiyo wixii shuruudo ah ee looga baahanyahay. Waxa loogu talo galey in qofkiiba lagu maal gallo qadar lacag ah \$500 soona celini doono Boqolkiiba 50% muddo sannad ah si uu mashruucani u sii socdo iyo in la maalgaliyuhu haysto ga-

nacsi yar ama fikir ganacsi oo lagu maalgaliyo.

Waa sidii kor loo qaadi lahaa dhaqaalaha qoysaska danyarta ah ee hore u sii lahaa ganacsi yar-yar iyo kuwa bilow ah si loogu sameeyo fursado shaqo abuur, loona yareeyo saboolnimada, korna loogu qaado awooda dhaqaale ee qoysaskaasi iyo Degmoba si uu u keeno dakhli korodh.

Mashruucani waxa uu fursad nololeed siiyay 250 qoys oo maanta meel fiican kaga jira bushada waxaanu dhiirrigaliyeen inuu mashruucu noqdo mid sii socdo, waxayna dhamaanba soo celiyeen intii laga doonayay oo ah 50% inta la daymiyay, waxay horseed u tahay iyo bilaw cusub kor u qaadida iyo dhiiri galinta bulshada. Guud ahaanba waxa is badal ku keeneen dhaligil dawlada hoose kaas oo kor u qaadida qaysaska ka faa'day ay isbadal muuqda ku sameeyeen cashuurta ka soo xaroota ganacasiga yaryar.



HIBO XASAN
AGAASMANHA QORSHEYNTA DAWLADDA HOOSE EE GABILEY



NALA QURXI GABILEY

Hibo Xasan Haaruum
Agaasimaha Waaxda Qorshaynta
Dawlada Hoose ee Gabiley

Magaalada Gabiley waa magaalada leh siyaasadda Dhiraynta iyo Maareynta Qashinka taasi oo u horseeday inay noqoto magaalo nadiif ah oo aan lahayn qashin yaala meelaha loogu tallo galey meel aan ahayn. Gabiley Waxay kala simantahay degmooyinka kale dhibaataada Geedka Garanwaaga iyo Dhagaxa. Geedka garanwaaga oo sanadihii u danbeeyay qabsadey magaalada, kaasi oo ka saarey dhirtii dabiiciga ahayd, keenayna nadaafad daro oo noqday goobo qashin qub iyo inuu meelaha qaar ka dhigo laago.

Sidoo kale dhagaxa oo isaguna ah hadhaaga dhismayaasha guryaha, oo xidhey dhamaan wadooyinka xaafadaha dhex mara oo bilicdii magaalada foolxumo ku keenay. Qaabka Khariiddada Gabiley waa afar xaafadood, xaafad walbana waxa loo qaybiyey 4 aag (zone) oo gudaha ah, oo kala xadeeya xaafadaha iyo xaafadaha kale. Xaafad kastaa waxay leedahay xafiis ay Xarunta Dawlada Hoose ku leedahay oo fulisa dhamaan adeegayada dawlada hoose ee xaafada. Taasina waxay sahashey in si fudud hawlaha dhagaxa iyo garanwaaguba si fiican looga qabto.

Mashruuca nala qurxi Gabiley ee ururinta dhagaxa iyo goynta garanwaaga waxa uu hiigsanayaa in uu kor u qaado bilicda magaalada isaga oo qaadaya tallaabooyinka ay midtahay, in guryahay iyo waddooyinka laga nadiifiyo dhagaxaanta, in dhagaxaanta looga faaidaysto qaab farshaxan, in dhagaxaanta lagu xidho biyo mareenada, in garanwaaga laga dabargooyo magaalada oo lagu beero dhir. Ugu danbayn, talaabooyinkaasi waxa ay Gabiley gaadhsiiyaan hiigsiga siyaasadda Dhiraynta iyo Maaraynta Qashinka oo ah

magaalo cagaaran oo nadiif ah.



OLOLAHA

XAAFADA NEW GARI
EE DEGMDA GABILEY



MAGALINTA KOOWAAD EE OLOLAHA
DHAGAX URURINTA



XAAFADA LAAGBARAK
EE DEGMDA GABILEY



MASHRUUCA LAMBARINTA GURYAHA IYO WADOOYINKA

Mashruuca lambarinta guryaha iyo wadooyinka ee magaaladda Gabiley, nidaamka lambarinta guryaha oo dhamaystiran ayaa waxaa hirgalsiyay dawladda hoose Gabiley si loo fududeeyo, loona aqoonsado guryaha, meheradaha, iyo wadooyinka gudaha degmada Gabiley.

Mashruuca waxa uu fududayn doonaa adeeg-bixinta bulshada ee biyaha, laydhka, qashin gurka, adeegyada deqdega ah ee gaadiidka gurmadka caafimaadka, dalkemiska, iyo nabadgalyada. Waxa kale oo uu fududaanayaa nidaamka cashuur qaadista guryaha iyo dhulka bannaan iyo yaraynta muranka dhulka, mashruuca lambarinta guryaha iyo wadooyinka ayaa la hirgaliyay bilowgii sanadkan 25 august, 2023.

Maamulka dawladda ayaa keenay guud ahaan agabkii lagu dhajin lahaa ama lagu calaamadin lahaa guryaha iyo wadooyinka, agabkan oo ka koobnaa plate number-skiil iyo calaamadihii kala duwanaa. Dawladda hoose ee Gabiley oo kaashanaysa shaqaalewaynaha dawladda ayaa samaysay nidaamkan casriga ah ee lambarinta guryaha iyo wadooyinka iyadoo shaqaalewaynahan lagu tabobaray sidii ay guryaha ugu dhajin lahaayeen calaamadaha loogu talagalay si is xigxigta oo macquul ah si ay u sahlaanaato isku socodka.

Hilgista magaaladda Gabiley oo ah magaalo cagaaran, nadiif ah kuna haboon dalkiiska, si loo gaadho hadafkan

waxaa qayb wayn ka qaatay mashruuca nambartinta guryaha iyo wadooyinka si dadka iyo gaadiidka magaaladan cagaaran ee nadiifka ah imanaya ay si sahlan u helli karaan halka ay rabaan iyo dhamaan adeegyada ay ay u baahan yihiin iyagoon u baahnayn cid hagta.

Ugu dambayntii mashruuca lambarinta guryaha iyo wadooyinka ayaa ah mid la jaanqaadaya dunidan casriga ah, si aynu ula jaanqaadno adduunyadda inagoo raacayna habraacyadda caalamiga ah ee adduunyadu u guurtay. Hirgalinta nidaamka nambartinta guryaha iyo calaamadaynta magaalada Gabiley waxay u horseedi kartaa kor u qaadida badbaadada, horumarinta adeegyada, kobaca dhaqaalaha, iyo guud ahaan tayada nolusha dadka degan iyo kuwa soo booqatada.

QORAAQA
HIIBO XASAN HAARUUN
AGASIMAHA WAAKIDA QORSHAYNTA D/H EE GABILEY



MAARAYNTA XANUUNKA XUMADDA

Xafiiska maamul daadajinta caafimaadka ee degmada gabiley isagoo ka duulaya dardargalinta iyo baahinta adeegyada caafimaadka ee aasaasiga ah waxay marwaiba heegan ugu jiraan sidii ay uga jawaabi lahaayeen baahida caafimaad ee bulshada iyagoo kaashanaya wasaaradda horumarinta caafimaadka.

Sida aynu wada ognahay mudooyinkii u danbeeyay waxa guud ahaan somaliland ka jirtay xanuun ay gudbinayso nooc ka mida kanecada oo loo yaqaan aedes aegypti kanecadaa oo xambaarta virus ka loo yaqaan arboviruses kaas oo keena xumadda dengue fever. Xanuunkan oo leh calaamado ay ka mid yihiin xumad daran, madax xanuun, murqaha iyo kalagays-yada



oo qofka xanuuna iyo xaaladaha qaarna keeni kara qofku inuu dhligo soo raaco candhuufta, matagga, saxarada ama in dhilgu ka yimaado sanko.

Ugu horayn wasaaradda horumarinta caafimaadku waxay soo dirtay khuburro baadhitaan ku samaysa jiritaanka xumaddan ay gudbinayso nooc ka mida kanecada. Ugu danbayn gungaadkii ay soo saareen wasaaraddu waxay ku cadeeyeen inay baadhitaanka ku sameeyeen todoba xarumood halka saddex ka mid ay noqdeen mid laga helay nooca kanecada gudbinaysa xumadda.

Dawladda hoose iyo wasaaradda caafimaadka oo iskaashanaya ayaa waxay sameeyeen in ay magaalada Gabiley ka bilaabaan buufinta guryaha kaas oo ujeedkiisu yahay sidii loo xakamayn lahaa faafitaanka kanecada. Guud ahaan guryahaya la buufiyay waxay ahaayeen 1,523 guri oo ka koobnaa 6,322 qol, marka laga yimaado tirada

JANUARY 2024

guryaha waxa soo raacayay 36 xarumood oo ay ku jireen iskuulo iyo xarumo caafimaad. Dhinaca kale dawladda hoose iyadoo xoojinaysa la dagaalanka kanecada waxa la sameeyay wacyigalin joogto ah halkaas oo lagu gaadhiyo guri guri kaas oo ay ka wada qayb qaadanaayen xarumaha caafimaadka iyo xafisyada xaafaduhu si loogu dhiiri galiyo bulshada ilaalinta nadaafada iyo degaanka.

Madaama ay kanecadu ku dhalanayso meelaha biyo fadhilsiga, waxay dawladda hoose buuxisay meelaha biyo qabatinka ah ee ku yaala magaalada gudaheega, iyadoo kaashanaysa dadwaynaha waxay bilowday sidii loo dabar jirilahaa geedka garanwaaga oo qayb weyn ka qaadanaaya taranka kanecada.

Ugu danbayn dhamaan hawlahaas kala duwan ee lagaga soo qabtay mudadaa ay socotay dabar goynta kanecadu waxay keentay in si filican loo xakameeyay faafitaanka kanecada.

Sidoo kale waxaa hoos u dhacday bukaanaadii ka caban-



ayay xanuunka xumadda ee booqanayay xarumaha caafimaadka.

Marwaiba dawladda hoose ee Gabiley waxay heegan buuxa ugu jirtaa sidii ay uga jawaabi lahayd baahiyaha aasaasiga ee caafimaadka uguna hortagilahaayd khataraha.

QORAAQA
MUXTYADIN MAXAMED GALINLE
MADAXA XAFIISKA CAAFIMAADKA D/H EE GABILEY



DOORKA AY DAWLADA HOOSE GABILEY KU YEELATAY HORUMARINTA ADEEGA CAAFIMAAD EE GEBOLKA GABILEY

Qoraaga:
Hibo Xasan Haaruun
Agasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Gabiley

Sida dastuurka somaliland farayo qodobka 17 aad dawlada waxa xil ka saaran yahay horumarinta iyobaahinta adeegyada caafimaad, iyadoo laga duulayo taas, waxay dawlada hoose ee degmada gabiley bilawday dabayaaqadii 2018kii inay dardar galiso adeegyada caafimaad ee guud ahaan gobolka. Ka hor intii aanay bilaabin balaadhinta adeegyada caafimaad ee gobolka waxaa ku yaalay 7 xanaano iyo 8 rugo caafimaad.

Dhamaan xanaanooyinka aan kor ku xusan may lahayn qol dhalmotaas oo keeni karta dhimasho iyo khatar caafimaad oo soo waajahda hooyada iyo ilmahaba, sidaa darteed waxay dawlada hoose ka hir galisay dhamaan todobadda xanaano qol dhalmo. Isla markaana waxay ku kordhisay 10 xanaano iyo 13 rugo caafimaad. Wadarta guud ee xanaanooyinku hada waa 18 xanaano iyo 20 rugo caafimaad dhamaan waxay u shaqaynayaan si habsami leh.

Dhinaca kale waxay dawlada hoose kordhisay shaqaalihii ka hawl galayay guud ahaan gobolka inka badan boqolkiiba boqol iyo kontan(150%), isla markaana waxay kor u qaaday tayayntii shaqaalaha iyadoo loo sameeyay tabbaro badan.

Waxaa xusid mudan in ka hor 2018 degmada gabiley guud ahaan ay ku taalay hal xanaano, maantana xaafadkasta oo degmada kamid ahi ay leedahay xanaano.

Guud ahaan gobolku muu lahayn emergency center (call center) la gala soo xidhiidho marka shil gaadhi ama khatar kale dhacdo, waxay dawlada hoose ka hirgalisay dhakhtar weyn ee gabiley qaybta gargaarka degdega ah si loogala soo Xidhiidho marka shil dhaco ama khatar caafimaad timaado.

Dawlada hoose iyada oo ka duulaysa muhiimada uu leeyahay in la sameeyo kaydka dhiiga waxay dhakhtarka weyn ee gabiley ka hir galisay qayb-


ta kaydinta dhiiga (blood bank).

Si loo yareeyo tirada dhimasha caruurta jirta in ka yar ama leeg 28 maalin, waxay dawlada hoose ka dhistay dhakhtarka weyn ee gabiley waadh loogu adeego caruurta (neonatal intensive care unit).

Dhamaan xanaanooyinka waxa laga abuuray shaqaale sameeyaya wacyi galin joogto ah isla markaana hooyooyinka iyo dhalaanka ku booqda gurayaha (door to door) si looga war hayo hooyada iyo ilmaha iyagoo jooga guriga laguna soo xidho xanaanaada ujeedada guud ee ay dawlada hoose ka leedahay caafimaadku waa in la fidiyo adeega caafimaad ee aasasiga (primary health care) si qof kasta oo muwaadin ahoo dagan gobolka gabiley inuu helo adeegcaafimaad oo tayo leh isla markaana dhaqaale ahaan uu awoodi karo.



Ugu danbayn dadaalada badan ee ay samaysay dawlada hoose waxay keenen in muwaadin kastaahelo adeeg caafimaad oo tayo leh, sidoo kale waxaa kordhay 58% tiradii ciyaalka helayay talaal dhamays tiran, waxaa yaraaday dhimashadii ciyaalka ka yar shan sano iyo hooyada xiliga uurka, guud ahaan gobolka waxaa kordhay booqashadii ay booqanayeen xarumaha caafimaadka hooyada iyo dhalaanka.



GABILEY

DIWAANGALINTA HANTIDA MAGUURTADA EE MAGAALADA GABILEY

Mashruuca Diwaangalinta Hantida Maguurtada ah ee magaalada Gabiley waa mashruuc loogu talagalay in loogu sameeyo guryaha iyo waddooyinka magaalada Gabiley sum-mado sax ah si loola jaanqaado qaababka casriga ah ee helitaanka guryaha iyo waddooyinka. Mashruucu waxa uu fududayn doona adeeg-bixinta bulshada ee biyaha, laydhka, qashin gurka iyo adeegyada degdegga ah ee gaadiidka gurmadka caafimaadka, dabdamiska, iyo nabadgalyada. Waxa kale oo uu fududaanayaa nidaamka cashuur qaadista guryaha iyo dhulka bannaan, yareynta muranka dhulka, sidoo kale waxaa uu sahlayaa tirakoobka guryaha magalada taasoo guri kastaa yeelan doono astaan u gaar ah. (House number) oo lagu aqoonsado.

Mashruucani waxa uu soo maray marxalado kala duwan oo ay ka mid yihiin la-tashiyada Golaha Deegaanka, agaasimayasha waaxyaha iyo gudoomiyayaasha xaafadaha si loo magacaabo guddi farsamo iyo Kormeer. Waxa lala-tashaday wacyigalinta loo sameeyay bulshada oo iyaguna qayb muhiima ah ka ahaa fulinta mashruucani iyo waliba tabobarka halwadeennada qabanayey.

Shaqadu waxa ay socotay July, 20, 2022 ilaa October, 13, 2022 waxaana la diwaan-galiyey 8,725 oo iskugu jira guryo iyo dhul banaan. Degmada Gabiley ayaa ah deg-

madii ugu horraysay ee mashruucan dii-waangalinta hantida maguurtada ah laga hirgeliyo. Diiwaangalinta dhulka iyo guryaha bannaan oo ku dhammaan lahayd muddo sannad ah ayay Dawladda Hoose Degmada Gabiley ku soo gabogabaysay muddo laba bilood ah iyada oo ka faaiid-eysanaysay aqoonta iyo hawlkamimada

shaqaalaha dawladda Hoose ee Gabiley.

Ujeeddada mashruucan laga leeyahay ayaa ah horumarinta iyo ilaalinta hantida maguurtada ah ee magaalada Gabiley. Waxa kale oo ujeedooyinka mashruucan ka mid ah adeegsiga qaab summadeed-ka casriga ah ee guryaha loola ula jaan qaadi karo qaababka cusub ee caalam-ku summada guryaha u adeegsadaan. Waxa kale oo uu mashruucani innaga caawin karaa helitaanka diiwaanka guryaha ku jira buugga diiwaanka dhulka iyo guryaha. Waxa kale oo uu sahlayaa helida xaaladda dhaqan-dhaqaale iyo tirakoob-ka saxda ah ee bulshada.

